



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Febraayo 24, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)
Ujeedada: ODDS oo u dabaaldegaysa Bisha Taariikhda Dadka Madow

ODDS ayaa ku soo biirtay Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) ee dabaaldegga Bisha Taariikhda Dadka Madow. Warqadani ku socota shaqaalaha ODHS, Agaasimaha Fariborz Pakseresht ayaa in xusuusinaysa in Bisha Taariikhda Dadka Madow ay tahay taariikhda Maraykanka. Waxaanu sharafnaa hoggaamiyayaasha dadka Madow ee hore iyo kuwa hadda ee cododkooda, u doodistooda, dhiirigelintooda, dulqaadkooda iyo naftooda haray isla markaana siina wada in ay dhiirgeliyaan sinnaanta shaqada ee ODHS iyo ODDS.

Mid ka mid ah hoggaamiyahaasi oo dadka uga dhex dooda bulshada naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) ee Oregon waa Donna Stoney. Donna waxay ahayd maamulaha kiiska ee Madow ee ugu horreeyay ee ka tirsan nidaamka I/DD ee Degaanka Multnomah. Waxay sii waday in ay aasaasto oo maamusho guryaha koox ahaanta loo degan yahay ee loogu talagalay dadka reer Oregon ee qaba I/DD. Sanadihii la soo dhaafay, Donna waxay ballaarisay shaqadeedii wax u doodista oo gaarsiisay ganacsiga khamriga ee Oregon. Waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan taariikhda Donna iyo xirfada shaqo ka akhri website-ka ODDS <https://go.usa.gov/xtJXK>.

Waxaan kugu dhiirigelinayaa in aad waxyaabo badan ka ogaato tabarucaadka dadka Madow ee u dooda naftooda, taariikhdooda iyo cododkooda hadda jira ee bulshada I/DD dhexdeeda.

- [Betty Williams](#) (1959–2016), oo ah hoggaanka gobolka iyo qaranka ee dhanka dhaqdhaqaaqa isku doodida, oo u adeega Guddiga Madaxweynaha ee loogu talagalay Dadka qaba Naafanimada Maskaxda ee hoos timaada Madaxweyne Obama iyo guddiyada Self-Advocates Becoming Empowered, Ururka Maraykanka ee Dadka qabana Naafanimada ‘American Association of People with Disabilities’, iyo The Arc of The United States. Betty si qoto dheer ayay ii saameysay shaqadeydii hore markii aan la shaqeeyay iyada Indiana dhexdeeda.
- [Andraéa Lavant](#) waa aasaasaha of LaVant Consulting Inc., oo ah shirkadda xiriirka ee saameynta bulshada oo ku takhasustay awoodsiinta shirkadaha “si loogu hadlo si kalsooni leh.” Sidoo kale iyadu waa Soo saaraha Saameynta ‘Impact Producer’ ee sheekada ‘documentary’ loo magacaabay Oscar-ka ee [“Crip Camp.”](#)
- [“The Intersections and Divergences of Disability and Race”](#) ee Keith Rosenthal.
- Sheekada ‘documentary’ [“Black Disabled Men Talk Qaybtii 6: Black Ableism”](#) wuxuu ku saabsan yahay shaqada Mashruuca Ka hortagga Taranka Qorsheysan ‘Anti-Eugenics Project’.
- ChrisTiana ObeySumner waa CEO-ga iyo la taliyaha guud ee [Epiphanies of Equity, LLC](#). ChrisTiana waxay qortaa oo ka hadashaa kala duwanaanshaha jinsiga iyo naafanimada [“#DisabilitySoWhite: Milicsiga ku saabsan Jingsiga iyo Naafanimada ee Maalinta ADA Day”](#) iyada oo fiidiyowga dhexdiisa [“Jinsiyada iyo Naafanimada Lagala hadlayo ChrisTiana ObeySumner.”](#)
- [“Bisha Taariikhda Dadka Madow: Dadka caanka ah ee Maraykanka Madow ah ee Naafada ah”](#) ee Advancing Opportunities.

Kulankii dhawaa ee ODDS, qof u dooda naftiisa ayaa sheegay in labadii sano ee la soo dhaafay, cudurka baahsani uu ina kala qaybiyay oo ina go’doomiyay. Waxaa la joogaa waqtigii la isku soo noqon lahaa iyo hab ay u dhan yihiin dhammaan codadku.

Waan ku raacsanahay Waxaan mar walba fiiriyaa doorkayga ku aadan taageerada iyo dhiirigelinta carruurta iyo dadka waaweyn ee qaba I/DD, laakiin ma yeelan karno sinnaan iyo ka mid noqosho iyada oo uusan jirin ka qayb galinta kuwa ka tirsan bulshada I/DD ee ah dadka Madow, Dadka dhulka loogu yimid iyo dadka Midabyada kala duwan leh, iyo dadka leh aqoonsiyada isweydaarsan. Waxaan kugu martiqaadayaa in aad igula soo

biirto balan qaadka shaqada muhiimka ah ee dabaaldega iyo ka qayb galinta dadka wax u dooda ee Madow ee ku nool Oregon.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.